**DIMUQRAADIYAD, CADAALAD IYO HORUMAR**

# DASTUURKA

# XISBIGA DARYEEL QARAN

**DIMUQRAADIYAD, CADAALAD IYO HORUMAR**

# TUSMADA XEERKA

Cover Page ……………………………………………………………………………………………………….page 1

Tusmada Buuga…………………………………………………………………………………………………page 2-4

Horudhac……………………………………………………………………………………………………………page 5-6

Cutubka Koowaad……………………………………………………………………………………………page 6

Qodobka Koowaad: Magaca, Astaanta, Calanka & Xarunta………………………...page 6

Magaca iyo Astaanta Xisbiga……………………………………………………….page 7

Calanka iyo Xarunta Xisbiga……………………………………………………….page 7

Cutubka 2aad……..........................................................................................................page 7

Qodobka 2aad: Aragtida, Howsha, Mabaadiida & Ujeedooyinka…………………….page 7

Aragtida xisbiga……………………………………………………………………..  page 7

Hawsha xisbiga, Mabaadiida aas-aasiga ee xisbiga, falsafada aas-aasiga iyo

Mabaadii-da dhaqan dhaqaale ee xisbiga…………………………………………….page 8

Mabaadii-da siyaaadeed iyo ujeedooyinka xisbiga…………………………………..page 9-10

Cutubka 3 aad: ……………………………………………………………………….page 10

Qodobka 3aad: Xubinimada Xisbiga………………………………………………….page 10

Shuruudaha xubinimada iyo nidaamka is diiwaangelinta…………………………….page 11

Aqbalaada xubinimada iyo joogteynta xubnaha xisbiga……………………………..page 12

Xuquuqda xubnaha xisbiga, waajibaadka xubnaha xisbiga………………………….page 12

Waayista xubinimada xisbiga iyo warbixinada iyo qaaraanka xisbiga………………page 13

Taagerayaasha xisbiga……………………………………………………………….page14

Cutubka 4aad……………………………………………………………………….. page 14

Qodobka 4aad: Qaab dhismeedka Xisbiga………………………………………….. page 14

Qaab dhismeedka Hay-adaha heer qaran.…………………………………….……. page 14

Awooodaha iyo shaqooyinka shirweynaha…………………………………………….…page 14

Qodobka 5aad:…………………………………………………………………………page 15

Golaha dhexe ee xisbiga………………………………………………………………page 15

Awoodaha iyo shaqooyinka golaha dhexe……………………………………………..page 15

Faahfaahinta shuruudaha golaha dhexe………………………………………………..page 16

Hawlaha golaha dhexe…………………………………………………………………page 16

Fadhiyada golaha dhexe………………………………………………………………..page 17

Qodobka 6aad:…………………………………………………………………………page 18

Golaha fulinta…………………………………………………………………………..page 18

Xubnaha gudiga fulinta, xilalka gudiga fulinta, …………………………..……..…page 18

Waajibaadka gudiga fulinta iyo fadhiyada/kulamada gudiga fulinta…………………..page 19

Awoodaha iyo shaqooyinka gudiga fulinta…………………………………………… page 19

Habraaca doorashooyinka gudiga fulinta/guntanka kulamada…………………………page 20

Qodobka 7 aad:…………………………………………………………………………page 20

Hogaanka xisbiga:……………………………………………………………….. page 20

Gudoomiyaha xisbiga…………………………………………………………………..page 20

Shuruudaha iyo gudoomiyaha xisbiga……………………………………………….…page 21

Gudoomiye kuxigeenka xisbiga………………………………………………………...page 21

Xoghayaha guud ee xisbiga, musharixiinta xisbiga, ……………………………..….page 22

Musharixiinta golayaasha iyo doorashooyinka…………………………………………page 22

Qodobka 8 aad…………………………………………………………………………..page 23

Sixiixayaasha idman ee xisbiga…………………………………………………………page 23

Qodobka 9 aad:………………………………………………………………………….page 23

Dukumentiyada siyaasadeed…………………………………………………………….page 23

Qodobka 10 aad:………………………………………………………………………..page 24

Maamulka maaliyada iyo hantida xisbiga……………………………………………..…page 24

Ilaha dhaqaalaha xisbiga………………………………………………………………...page 25

Habka maamulka iyo maareynta maaliyada xisbiga…….………………………………page 25

Qodobka 11 aad:………………………………………………………………………..page 26

Xafiiska hawl-wadeenada, mutadawiciinta iyo shaqaalaha xisbiga……………………page 26

Qodobka 12 aad:………………………………………………………………………..page 26

Ilaalinta dimuqraadiyada………………………………………………………………page 26

Qodobka 13 aad:………………………………………………………………………… page 26
Xalinta qilaafaadka……………………………………………………………… page 26
Qaab dhismeedka gudiga xlinta qilaafaadka………………………………………..page 26
Masuuliyada gudiga, dhisida gudiga………………………………………………..…page 27
Habraaca xalinta qilaafaadka………………………………………………………page 28
Qodobka 14 aad……………………………………………………………………page 29
Anshax marinta xisbiga…………………………………………………………..page 29
Qaab dhismeedka gudiga…………………………………………………….… page 29
Dhisida gudiga, falalka anshax marinta…………………………………………… page 30
Qaabka dacwad qaadista iyo shuruudaha anshax marinta…………………………… page 30
Qodobka 15 aad:……………………………………………………………………page 31
Wax kabadalka iyo kaabista dastuurka, magaca iyo astaanta…………………………page 31
Qodobka 16 aad:……………………………………………………………………page 31
Habka xisbi ku biirista…………………………………………………………….. page 31
Qodobka 17 aad:……………………………………………………………………page 32
Fasiraada dastuurka…………………………………………………………………page 32
Qodobka 18 aad:……………………………………………………………………page 32
Xeer hoosaad……………………………………………………………………….page 32
Qodobka 19 aad:……………………………………………………………………page 33.
Dhaqangalka xisbiga…………………………………………………………….page 33
Qodobka 20 aad:……………………………………………………………………page33
Baabi-inta xisbiga iyo hantidiisa…………………………………………………...page 33
Dhamaad……………………………………………………………………………page 33

**DIMUQRAADIYAD, CADAALAD IYO HORUMAR**

**Ref:…XDQ-001……..…** **Date: 26-02 -2019……….**

# XEERKA XISBIGA DARYEEL QARAN

## HORUDHAC

Soomaaliya waxay soo martay marxalado iyo maamulo kala gedisan oo isugu jiray gumeysi, axsaab, xukun malateri, dawlad la-aan iyo dagaalo sokeeye oo waqti dheer ragaadisey horumarka dalka Iyo dadka soomaaliyeed. Soomaliya waxay ku guuldaraysatay inay dhisato dawlad xasilisa dalka islamarkaana ka saarta colaadaha, cadaalad darada, masuq-maasuqa, faqriga, iyo dibu dhaca dhaqaale. Sommaaliya waxay banaan joog ka noqotay mudo rubuc qarni ah ururo iyo hay-ado caalami ah oo ay xubin buuxda ka aheyd burburkii dawladii dhexe kahor, hadaba in ka badan 20 shir oo dibu heshiisiineed oo ay beesha caalamku dalka dibadiisa ku qabatey si soomaaliya loogu dhiso dawlad dalka hanata ayaa waxay ku soo dhamaadeen natiijo la-aan.

Hadaba iyadoo labadii baarlamaan iyo xukuumad ee 2012 iyo 2016 dii lagu soo dhisay gudaha dalka soomaaliya ay heleen citiraaf caalami ah islamarkaana laga saarey Soomaaliya marxaladii kumeelgaarka ee ay dawladihii iyaga ka horeeyey ay ku soo shaqeeyeen ayaa taasi waxay muujisey yadidiilo dhinaca rajada ah oo ay shacabka soomaaliyeed u qabaan dawlad soomaaliyeed oo hanata kalsoonida shacabka, waxaase jira caqabado ku xeeran hanaanka

siyaasada, dibu heshiisiinta, federaaleynta, dimuqraadiyada, dhaqaalaha iyo horumarinta dalka iyo dadka soomaaliya.

Hadaba si looga baxo xaaladahaa qalafsan aan sare ku xusnay , Somaaliya waxay u baahan tahay dib-uhanashada dareenka shacabka soomaaliyeed iyo soo celinta sumcadii iyo sharaftii ay caalamka ku laheyd, waxayna ubaahan tahay dib udhis qaran oo dhan walba leh.

Hadaba si loo gaaro yoolkaas waa in la helaa axsaab siyaasadeed oo aan kudhisneyn aragti qabiil, xagjirnimo iyo kooxeysi, hadaba si looga gudbo hanaanka awood qeybsiga beelaha ee 4.5 layiraahdo, waa in dalka laga hirgeliyaa doorasho qof iyo cod ah oo xor iyo xalaal ah, sidaaasi darteed, anagoo xaqiijinayno aragtidaas fog ayaa waxaan aas-aasnay Xisbiga Daryeel Qaran 15kii July 2018.

Xeerka Xisbiga waxaa la ansixiyey Shirwaynihii aasaaska Xisbiga oo ka dhacay 5 tii – 7 dii Agoosto , 2018 laguna qabtey magaalada Muqdisho

# CUTUBKA 1AAD

# QODOBKA 1AAD

# MAGACA, ASTAANTA, CALANKA & XARUNTA

**1) MAGACA XISBIGA**

Magaca xisbiga waa Xisbiga Daryeel Qaran, oo loo soo gaabiyo (X.D.Q) ama Daryeel National Party (DNP) oo luuqada English ka ah,

**2) ASTAANTA XISBIGA**

Astaanta xisbigu waa labo caleemood oo buluug ah, dhexda waxaa ku jira calanka iyo qariirada dalka soomaaliya, dalad ayaa dusha sare ka saaran oo cagaar iyo jaale ah, waxaa ugu hooseeya frame xidig buluug dhexda kuleh,oo ay dusha kaga qoran tahay magaca xisbiga oo ku qoran luuqada ingiriiska oo la soo gaabiyey DNP oo micnaheedu tahay daryeel national party.

### 3) CALANKA XISBIGA

Calanka xisbiga waa afar gees leh midabka huruuda ama jaale oo ay dhexda uga sawiran tahay loogada XISBIGA DARYEEL QARAN oo ay dusha uga qoran tahay Dimuqraadiyad, Cadaalad iyo Horumar, halka ay hoos uga qoran tahay Democracy, Justice iyo Development

### 4) XARUNTA XISBIGA

Xarunta Xisbiga waxay kutaal Africa hotel- KM4 Muqdisho oo ah caasimada dalka soomaaliya, xisbiga wuxuu xafiisyo dheeraad oo kale ku yeelanayaa dhamaan xarumaha Dowlad Goboleedyada xubnaha ka ah Dawlada Federaalka Soomaaliya iyo gobolada dalka

# CUTUBKA 2AAD
# QODOBKA 2AAD

# ARAGTIDA, HOWSHA, MABAADIIDA & UJEEDOOYINKA

### 1) ARAGTIDA XISBIGA

Aragtida xisbiga daryeel qaran ee Soomaaliya: - Hal Soomaali, Hal Qaran iyo Hal dad. Xisbigu wuxuu leeyahay  siyaasad qeexan  oo ka kooban sagaal tiir, taas oo ka tarjumaysa aragtida Xisbiga, waxayna cabiraysaa farqiga iyo isbadalada siyaasadeed ee uu dalka soo maray tan iyo markii ay curatey jamhuuriyada Soomaaliya 1960 kii, wuxuuna xisbiga badalayaa hab dhaqan

siyaasadeedka soomaaliya isagoo ku xisaabtamaya waqtiga ka dhumay shacabka soomaaliyeed iyo taageerada ay beesha caalamka gelisey soo celinta nabada iyo dawladnimada soomaaliya, wuxuuna xisbiga fulinayaa qorshe siyaasadeed saldhig u ah tiirarka iyo mabaadiida aas-aasiga ah ee ku dhisan aragtida xisbiga.

## 2) HOWSHA XISBIGA

Howsha xisbiga daryeel qaran ee Soomaaliya:-

a. Abuurista, kobcinta iyo joogtaynta dowlad dimoqraaddi ah.
b. Xoojinta siyaasadaha ku aadan arimaha bulshada iyo daryeelkooda
c. Diyaarinta fursado ay usiman yahiin dhamaan muwaadiniinta soomaaliyeed

## 3) MABAADIIDA AAS-AASIGA EE XISBIGA DARYEEL QARAN

Tiirarka mabaadiida aas-aasiga ee xisbiga waa sagaal (9) tiir oo mucayin ah sida :-

1. Kor uqaadida sareynta sharciga iyo kudhaqanka shareecada islaamka
2. Hirgelinta ku dhaqanka dimoqraadiyada
3. Difaaca jiritaanka dhulka jamhuriyada federaalka soomaaliya
4. Baahinta nidaamka maamul wanaaga, sinaanta iyo cadaalada
5. Ka shaqeynta dhisida hanaan siyaasadeed hufan oo kudhisan isla xisaabtan
6. Gaarsiinta nidaamka federaalka dhamaan gobolada dalka JFS
7. Abuurida xasilooni siyaasadeed oo dalka ka hirgasha
8. Hagaajinta xiriirka dawladaha deriska iyo guud ahaan caalamka
9. La dagaalanka xagjirnimada, faqriga, jahliga, tirtirida heyb-sooca iyo ilaalinta xuquuqda dumarka , caruurta iyo waayeelka

## 4) FALSAFADDA AAS-AASIGA AH EE XISBIGA:-

1. Hab dhaqanka bulshada ee deegaanka in aysan noqon mid waxyeelaysa deegaanka.
2. Daryeelka khayraadka waxay muhiim u tahay nolosha bulshada oo waarta
3. Masuuliyadda xisbiga daryeel qaran waa ilaalinta dadka, bada iyo dhulka soomaaliya, si muwaadiniinta soomaaliyeed ugu noolaadaan xaalad caafimaad

## 5) MABAADIIDA DHAQAN-DHAQAALE EE XISBIGA:-

1. Hirgalinta kobac dhaqaale oo aan xadidnayn

2. Qaybinta khayraadka oo caddaalad ku salaysan
3. Ragga iyo dumarka labadaba waa in ay awood u yeeshaan in ay si siman oo buuxda uga qayb qaataan dhammaan masuuliyadaha nolosha.

## 6) MABAADIIDA SIYAASADEED EE XISBIGA:-

1. Dhamaan go'aamada siyaasadeed, bulsho iyo dhaqaale waa in lagu qaataa heerka ugu hooseeya ee waxtarka leh.
2. Go'aan gaarista waa in sida ugu suurto galsan loogu saleeyaa wadahadal, iyadoo la tixgalinayo xuquuqda dadka laga tirada badan yahay
3. Hormarinta bulsho isku kalsoon, iskutashata oo  wada noolaato
4. Hirgalinta nabad iyo caddaalad si loo hormariyo danaha qaran iyo maslaxadda ganacsiga
5. Tixgalinta iyo ilaalinta geedi socodka siyaasadeed ee dimuqraadiga ah

## 7) UJEEDOOYINKA XISBIGA

1. Xoojinta iyo ilaalinta aragtida, himilada iyo howsha xisbiga si loo abuuro dowlad dimoqraaddi ah.
2. Diyaarinta hogaan siyaasadeed oo u horseeda dalka iyo dadka soomaaliyeed:-
    - i Midnimo iyo barwaaqo
    - ii Dimoqraadiyad iyo dowlad-wanaag ku salaysan saraynta sharciga
    - iii Tixgalinta xuquuqda iyo xoriyaadka muwaadiniinta soomaaliyeed
    - iv Ixtiraamka dhaqanka iyo qiyamka suuban ee ummadda soomaaliyeed
    - v Kudhaqanka shareecada islaamka
    - vi Tixgalinta kala duwanaanshaha aragtida siyaasadeed iyo jinsi
3. Sare u qaadista wacyigalinta bulshada, kaqaygalka siyaasadeed.
4. Tixgalinta aragtida bulshada deegaanka, ururada bulshada rayidka, qurba-joogta soomaaliyeed iyo ganacsatada.
5. Dhisidda bulsho ku xiran alle, lehna anshax wanaagsan iyo qiyam ku haboon.
6. Sare u qaadista dhaqaalaha, siyaasadda bulshada iyadoo aan loo eegin jinsi, dhaqan iyo arati.
7. Kobcinta midnimo ku salaysan danaha iyo maslaxadda umadda soomaaliyeed.

8. Ilaalinta qaranimada, midnimada, amniga iyo danaha umadda soomaaliyeed.
9. Ilaalinta iyo horumarinta wax soosaarka gudaha, siyaasadda waxsoosaarka gudaha iyo xoriyadda muwaadinka sida uu qeexay dastuurka kmg ee dalka.
10. Ilaalinta iyo hormarinta mabda’a awood qaybsiga sharci dajinta, fulinta iyo garsoorka.
11. Ilaalinta iyo hormarinta mabda’a awood qaybsiga saddexda heer dowladeed ee dastuurkeenu qeexay dowladda federaalka, dowlad goboleedka iyo dowladda hoose
12. Hormarinta caddaaladda bulshada, baabi’inta midab takoor ku aadan dadka laga tirada badanyahay iyo kuwa la hayb sooco.
13. Ilaalinta iyo sare uqaadista ka qayb galka go’aan gaarista gaar ahaan da’yarta, maamulka iyo qaab dhismeedka siyaasadeed ee dalka.
14. Ilaalinta xuquuqda aas-aasiga ah ee dadka baahida gaarka ah qaba iyo caruurta.
15. Hormarinta wax soosaarka warshadaha. Beeraha iyo adeegga iyadoo saldhig u noqonaysa casriyaynta waxsoosaarka dalka waxaana loo marayaa siyaasad iyo istaraatijiyad dheeraad ah.
16. Kobcinta baahiyaha aas-aasiga ah sida:-
    - i Waxbarashada
    - ii Caafimaadka
    - iii Hoyga iyo huga
    - iv Cuntada
    - v Daryeelka amni ee bulshada
17. Hirgalinta dastuur ilaaliya xuquuqda aas-aasiga ah ee muwaadinka.
18. Hormarinta maamul wanaagga, kahortaga kuxadgudubka awoodda xafiiska.
19. Ilaalinta iyo dib u hagaajinta deegaanka.

# CUTUKA 3AAD

# QODOBKA 3AAD

# XUBINIMADA XISBIGA

**1) SHURUUDAHA XUBINIMADA**

Ka mid noqoshada xisbiga waxa ay u furantahay qof kasta oo muwaadin Somaaliyeed ah, buuxiyana shuruudaha soo socda:-

1. In uu yahay muwaadin Soomaaliyeed.
2. Da'diisu gaartay 18 sano.
3. Dhimirkiisu taab yahay.
4. In uu aqbalaa cutubka 2aad ee dastuurkan
5. Bixinta khaaraanka xisbiga
6. Aaminsan mabda'a xisbiga oo ah midnimada Somaaliya.
7. Diyaar u ah inuu ka qaybqaato fulinta barnaamijka xisbiga.
8. Diyaar u ah inuu bixiyo qaaranka xubinnimada xisbiga oo ah 5 US$ sanadkii.
9. Oo aan xubin ka ahayn ama taageero u ahayn xisbi kale oo siysaasi ah oo ka jira dalka Somaaliya.

**2) NIDAAMKA IS DIIWAANGALINTA**

1. Dhamaan codsayaasha xubinimadda xisbiga ee soo buuxiyay shuruudaha ayaa loo ogolyahay in ay dalbadaan foomka codsiga xubinimadda kana dalbadaan xarunta xisbiga ee ku taal degmada, laanta iyo xarunta xisbiga ee jaaliyadiisa ama waxa uu kasoo rogan karaa shabakada xisbiga oo ah www.daryeelnationalparty.com. Mana jireyso wax kala sooc ah oo lagula kacayo codsadaha nooc kasta uu yahay.
2. Codasade kastaa waa inuu si haboon oo dhamaystiran u buuxiyo foomka codsiga xubinimada soona raacsho taariikh nololeedkiisa Resume ama CV, labo sawir iyo cadeyn banki/xawaalad oo cadeynaysa inuu bixiyay lacagta qaaraanka xubinnimada ee sanad walba ku waajibta xubnaha xisbiga.
3. Codsade kasta foomka codsigiisa xubinimo & dokumentigiisa ee waafaqsan qodobka shuruudaha ku xusan dastuurkan waa inuu u diraa xafiiska xisbiga ee degmadiisa ama laantiisa.
4. Xisbiga Daryeel Qaran waxa uu si gaar ah oo taxadar leh u eegayaa codsadayaasha naafada ah, wuxuu sinayaa caawinaad ku haboon naafo kasta.

**3) AQBBALAADA XUBINIMADA**

1. Dhamaan codsiyada ka midnoqoshada xisbiga waxaa ogolaanaya ama diidi kara golaha degmada ee uu codsaduhu codsigiisa u gudbiyay uuna degenyahay.
2. Codsade kastaa waxaa uu jawaabta gudiga degmada ee ku saabsan codsigiisa helayaa mudo ka yar labo usbuuc.

## 4) JOOGTAYNTA XUBINIMADA

1. Qofkasta oo xubin ka ah xisbiga waxa uu xubin buuxda ka yahay hal degmo oo ah degmadiisa uu ka diiwaan geshan yahay uuna deganyahay.
2. Xubinimadda xisbigu waxay ku salaysantahay sanadle (waxaa laga wadaa xubin kasta xubinimadeedu waa mid sanadla ah oo cusbooneysiinteedu ku xirantahay bixinta qaaraanka xisbiga).
3. Xubin kasta oo xisbiga ka mid ah waxa uu/ay cusboonaysiinaysaa xubinimada ugu danbeyn nofeembar sanad kasta, xubinimda waxay sii buuxda u jireysaa ilaa 31ka nofembar sandka xiga haddii aan xubinta la anshaxmarin.
4. Xubin kasta oo xisbiga ka tirsan oo aan cusbooneysiisan xubinimada xisbiga ka hor dhamaadka sanadka labaad, waa inuu marlabaad codsadaa foomka codsiga xubinimada xisbiga si la mid ah sida codsadayaasha cusub oo kale
5. Xubin kasta oo ka mida xisbiga oo qaaraan bixin la’aan owgeed in ka badan sedex jeer dib isu diiwaangelisa waxa ku adkaanaysa inay isu soo sharaxdo kuraasta xubnaha degmada, gobolka & golayaasha qaranka waxaana mudnaanta ka yeelanaya xubnaha sida joogtada ah u guta waajibaadkooda dastuuriga ah.
6. Hadii ugu yaraan shan xubnood oo ka tirsan xisbiga ay xubin ka mida xisbiga kusoo eedeeyaan inuu ku dhaqmay kala sooc/eex ama qabiilaysi taasoo si hoose u kala qeybinaysa xubnaha xisbiga waxaa uu si toos u wayayaa xubinimada xisbaga

## 5) XUQUUDA XUBNAHA XISBIGA

Xubin kasta oo ka mid ah xisbiga si joogta ahna u bixisa qaraanka xubinimada xisbiga waxay/ waxuu xaq ugu leeyahay xisbiga: -

1. Inuu helo warqada aqoonsiga xubinimo ee xisbiga.
2. Inuu ka qaybgalo xubin ahaan shirarka xisbiga ee degmooyinka & gobolada.
3. Inuu cod ka bixiyo ama laga doorto degamada uu ka diiwaangashan yahay:
4. In loo magacaabo jagooyinka gudiyada xisbiga sida waafaqsan dastuurka & sharci hoosaadyada xisbiga.
5. Inuu wakiil ahaan uga qeybgalo shirarka xisbiga ee heer qaran, hadii ay usoo magacowda degmada ama laanta jaaliyada uu ka tirsan yahay.
6. In loo gudbiyo lana socod siiyo siyaasada & waxqabadka xisbiga.

7. Inuu u soo jeediyo talooyin dhamaan xarumaha xisbiga.

**6) WAAJIBAADKA XUBNAHA**

1. Xubin kasta oo xisbiga ka mida waa inay/inuu gudataa waajibaadkan: Inuu ixtiraamo oo ilaaliyo sharafta & karaamada xisbiga.
2. Inuu ixtiraamo oo uu raaco dasuurka xisbiga.
3. Inuu si firfircoon uga qeybqaato fulinta barnaamijka xisbiga.
4. Inuu taageero go'aamada ay gaaraan dhamaan gudiyada xisbiga.
5. Inuu bixiyo lacagta qaraanka xubinimada xisbiga ee sanadlaha ah.
6. Inuu u gudbiyo maba'adiida xisbiga dadka Somaaliyeed ee aan xisbiga ku jirin

**7) WAAYISTA XUBINIMADA XISBIGA**

1. In uu geeriyoodo ama iskiis isku casilo.
2. In uu ka maqnaado saddex kulan oo is xigta fasax iyo cudurdaar la'aan qaybta uu ka tirsan yahay.
3. In ay sugnaato in uu la yimaado xadgudub iyo dhaqan xumo aan ku banaanayn shareecada islaamka ama aan la socon karin ahdaafta iyo mabaadii'da xisbiga iyo dhaqanka suuban ee Soomaaliya.
4. In uu ka mid noqdo xisbi kale ama urur leh ujeedooyin ka soo horjeeda xisbiga
5. In uu bixin waayo qaaraanka xubinnimada xisbiga haddii aan laga cafin.

**8) WARBIXINADA IYO QAARAANKA XISBIGA**

1. Xubin kasta oo ka mida xisbiga waxay bixinaysaa lacagta qaaraanka xubinimada xisbiga, waxayna siinaysaa xafiiska degmada ama xafiiska laanta jaaliyada xisbiga ee uu deganyahay ugu dambeyn 31 Nofeembar sanad kasta.
2. Xafiis degmeed kasta ee xisbiga waa inay diraan 70% lacagta qaaraanka xubinimada xisbiga kuna lifaaqaan warbixinta xubnaha degmada una diraan xafiiska gobolka ee xisbiga. 30% harey waxa ay noqonayaan qarashaadka xafiiska degmada, isticmaalka qarashka degmada waa in lagu cadeeyo dokumentiga warbixinta degmada ee loo gudbinayo xafiiska gobolka ee xisbiga.
3. Xafiis goboleed kasta ee xisbiga waa inuu diraa 40% lacagta qaaraanka guud ee xubinimada xisbiga ee gobolka kuna lifaaqo warbixinta xubnaha xisbiga ee gobolka, 60% harey waxa ay kala noqonayaan 30% qarashiyaadka xafiisyada degmooyinka u harey & 30% ah kharash xafiiska gobolka ee xisbiga, waa inay ku soo cadeeyaan isticmaalkeeda dokumentiga warbixinta gobolka ee loo gudbinayo xarunta dhexe ee xisbiga.

4. Xafiis degmeed & xafiis laameed kasta oo aan u dirin xafiiska gobolka lacagaha & warbixinada qaaraanka xubinimada xisbiga waqtiga loogu tala galay, waxay waayi karaan xuquuqaha ay ku leeyihiin xafiiska gobolka.

**9) TAAGEERAYAASHA XISBIGA**

1. Xisbigu waxa uu yeelanayaa tageerayaal si shaqsi ahaan ama koox ahaan u taageersan oo ah muwadiniin somaliyeed ama ajnabi/shisheeye oo degan dalka gudihiisa ama dibediisa.

# CUTUBKA 4AAD

# QODOBKA 4AAD

# QAAD-DHISMEEDKA XISBIGA

**1) QAAB-DHISMEEDKA HAY'ADAHA HEER QARAN**

1. Shirwenaha guud ee xisbiga
2. Golaha dhexe ee xisbiga
3. Golaha fulinta ee xisbiga

Dastuurka xisbiga Daryeel Qaran waxaa lagu aas-aasay shirweynaha qaran oo kulankiisa qabsoomayo ugu yaraan halmar afartii sano.

Ergooyinka uu ka koobanyahay sirweynaha guud waa ergooyinkan soo socda:-

1. Xubnaha golaha fulinta ee laamaha xisbiga
2. Xubnaha golaha dhexe ee laamaha xisbiga
3. Guddoomiyayaasha deegaanada xisbiga
4. Golaha dhexe ee xisbiga
5. Kudlada labada aqal ee heer qaran

**2) AWOODAHA IYO SHAQOOYINKA SHIRWEYNAHA**

1. Go'aamiyaan kuna dhawaaqaan siyaasadaha iyo barnaamijyada xisbiga
2. Abuurista si wada ogol ah siyaasadda, dhaqaalaha iyo siyaasadda bulshada ee xisbiga
3. Abaabulka muwaadiniinta si ay si buuxda uga qaybqaataan hirgalinta syaasadda, dhaqaalaha iyo siyaasadda bulshada
4. Sare uqaadista midnimo waafaqsan qiyamka iyo mabaadiida qaran
5. Tixgalinta iyo socodsiinta waxa ay soo gudbiyaan golaha dhexe iyo golaha fulinta
6. Ansixinta mabaadiida hagaysa xisbiga

7. U xilsaariddaa howlaha ku haboon golayaasha kale
8. Shirweynaha qaran kulankooda caadiga ah waa afartii sanaba mar
9. Kulanka aan caadiga ahay waxaa soo jeedinkara guddoomiyaha xisbiga markii uu latashado hogaanka sare, waxaa kaloo soo jeedinkara 2/3 golaha fulinta xisbiga
10. Kulamada caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn waxaa shirgudoominaya guddoomiyaha xisbiga, haddii uu maqanyahay kuxigeenkiisa
11. Ajandaha kulanka aan caadiga ahayn waxaa faafinta rasmiga ah ee xisbiga saaraya xoghayaha guud isagoo la tashanaya guddoomiyaha xisbiga ogaysiinayana kasooqaybgalayaasha muddo aan kayarayn 21 maalmood kahor muddada loo qabtay kulanka
12. Sida ay tilmaantay faqrada hore waxaa loo qabanayaa midka caadiga ah
13. Doorashada hogaanka xisbiga, gudoomiye, gudoomiye kuxigeen iyo xoghaye guud
14. Sameynta iyo wax ka badalka xeerka xisbiga

# QODOBKA 5AAD

## GOLAHA DHEXE

### AWOODAHA IYO SHAQOOYINKA GOLAHA DHEXE

1. Habraaca siyaasadeed iyo halbeeg cabireedka shirarka xisbiga
2. Kala macaamilka arimaha siyaasadeed ee xisbiga iyagoo matalaya shirweynaha qaran
3. Waxkabadalka dastuurka xisbiga iyadoo la adeegsanayo waxkabadalkan inta u dhaxaysa labada shirweyne, iyadoo shirweynaha ay u furantahay in uu kuraaco waxkabadalka golaha dhexe iyo in uu diido
4. U wakiilashada ergooyinka xubnaha ka ah howlaha sida
    a. Ansixinta miisaaniyadda sanadlaha ah ee xisbiga
    b. Ansixinta xeernidaamiyayaasha xisbiga ku xiran fulinta dastuurkan
    c. Hubinta iyo ansixinta xisaabxirka sanadlaha ah
5. Kulamada caadiga ah ee golaha dhexe waa sanadkiiba mar
6. Shir gudoonka kulamada golaha dhexe waa gudoomiyaha haddii uu Maqan yahayna waxaa gudoominaya kuxigeenkiisa
7. Kulamada golaha dhexe iyo ajandaha waxaa faafinta rasmiga ah kusoo saaraya xoghayaha guud isagoo latashanaya guddoomiyaha

8. Soojeedinta kulan aan caadi ahayn waxaa soo jeedinkara guddoomiyaha xisbiga isagoo latashanaya hogaanka xisbiga
9. Waxaa kaloo soo jeedin kara 2/3 xubnaha golaha fulinta

## 1) FAAHFAAHINTA SHURUUCDA GOLAHA DHEXE

1. Golaha Dhexe ee Xisbigu waxa uu ka kooban yahay 35 (sodon iyo Shan) xubnood oo lagu ansaxiyey Shirweynaha. Waana hay'adda ugu saraysa xisbiga inta u dhaxaysa labada shirwayne.
2. Xubinta Golaha Dhexe ee ay ku timaado xaaladaha ku xusan cutubka sedexaad, qodobkiisa 7aad ee xeerkan waxa loo buuxinayaa habka saamiga goboleedka gudiga heer gobol ee uu ka tirsanaa ayaa kusoo buuxinaaya mudo aan ka badnayn 45 maalmood iyagoo usoo gudbinaaya xoghayaha golaha dhexe ama ku-xigeenkiisa.
3. Xubinta cusub waxa ansixinaaya gudida fulinta ee xisbiga waa inuu xoghayaha guud qoraal rasmi ah ugu gudbiyaa Xafiiska Gudida Doorashooyinka Qaranka.
4. Shuruudaha xubinta golaha dhexe waa inuu
   a. Yahay xubin buuxda oo xisbiga ah
   b. da'diisu gaartay 25 sano
   c. Bixiyaa qaaraanka ku waajibay xubinta golaha dhexe bilkasta
   d. Aqoon ahaan waa inuu leeyahay ilaa dugsi sare

## 2) HOWLAHA GOLAHA DHEXE

Hawlaha Golaha dhexe ee xisbigu waxay noqonayaan:

1. Wuxuu dooranayaa xubnaha Gudida Fulinta marka laga reebo gudoomiyaha.
2. Waxa kale oo ay iska dhex dooranayaan saddex xubnood oo ah gudi hanti-dhawr oo u madax bannaan hawlahooda, islamarkaana toos ugu soo gudbin kara warbixintooda golaha dhexe
3. Waxay ansixinayaan miisaaniyada xisbiga, waxaanay toosinayaan nidaamka maamulka, hogaaminta siyaasada xisbiga iyo barnaamijyada siyaasada xisbiga lagu hogaaminayo.

4. Waxay dhagaysanayaan warbixinaha ay usoo gudbiyaan Gudiga Fulintu waxayna qiimaynayaan waxqabadka gudiga iyo horumarka hawlaha xisbiga iyagoo ka doodaya arimahaasi isla markaana go'aan ka soo saaraya.
5. Golaha Dhexe wuxuu ku hagayaa Xisbiga istiraatijiyada siyaasada ee ku salaysan wada tashiga iyo dimuqraadiyada iyadoo taladu ka imanayso xubnaha guud
6. Golaha dhexe waxa uu kor joogtaynayaa hawlaha xisbiga waxaana uu dajin karaa nidaam casriya oo lagu maamulo hantida xisbiga, laguna hoggaamiyo hawlaha isla markaana waxa uu ka joojin karaa hawlaha cid-kasta oo ay ku caddaato inuu wax u dhimayo hawlaha xisbiga ama aanu si daacada u wadin hawlaha xisbiga.
7. Waxay iska dhex dooranayaan guddi-hoosaadyo, guddi-hoosaad kastana waxay iska dhex dooranayaan guddoomiye, gudoomiye kuxigeen waxaana xoghayn u soo magacaabaya xoghayaha guud ee xisbiga.
8. Golaha dhexe waxa uu ansixinayaa heshiisyada dhexmara xisbiga iyo xisbi kale oo ku saabsan iskaashiyo wax-wada qabsi oo la xidhiidha arimaha siyaasada ee ay u soo gudbiyaan gudida fulintu iyaga oo ku ansixinaaya cod 2/3 ah.
9. Golaha dhexe waxa uu hubinayaa fulitaanka go’aamada hore loo ansixiyay iyo habka uu u fulay barnaamijka siyaasadeed ee xisbiga, waxaana uu tilmaamayaa habka ugu wanaagsan ee looga faa'iidaysanayo fursadaha soo mara xisbiga, islamarkaana waxa uu xallinayaa wixii khilaaf ah ee ku yimaada mas’uuliyiinta sare ee xisbiga, iyadoon waxba loo dhimayn doorka guddiga xalinta khilaafaadka.
10. Haddii ay xubin golaha dhexe ah ay ku timaado geeri ama uu ku waayo xubinimada sida ku xusan dastuurkan, waxaa soo magacaabaya xubinta lagu bedelayo laanta uu ka tirsanaa xubintaasi meesha ka baxday ka dibna waxaa ogolaanaya guddida fulinta waxaana ansixinaya kalfadhiga ugu horreeya ee golaha dhexe.

### 3) FADHIYADA GOLAHA DHEXE

1. Fadhiga golaha dhexe ee caadiga ah waxaa la qabanayaa sanadkii mar, laga bilaabo maalintii uu xirmay fadhigii ugu danbeeyay.

2. Waqtiga la qabanayo fadhiga golaha dhexe waxaa faafinaya xoghayaha guud ee xisbiga, waa in xoghayaha guud ku baahiyaa muddo aan ka badnayn 10 maalmood, haddii uu maqan yahayna waxaa muddadaa ku baahinaya ku-xigeenka Xoghaya guud.
3. Hadii ay timaado duruuf ka dhigta lagama maarmaan in laqabto fadhi aan caadi ahayn waxaa soo jeedinaaya gudida fulinta oo ku ogolaanaya cod haldheeriya ama 1/3 Golaha dhexe, waxaana fadhigaa lagu qabanayaa mudo aan ka badnayn labaatan maalmood.
4. Golaha Dhexe waxa uu yeelan karaa fadhiyo aan caadi ahayn ugu badnaan 2 jeer sanadkiiba.
5. Fadhiyada aan caadiga ahayn waxa ay ku qabsoomi karaan 50+ 1 xubnaha Golaha dhexe, fadhiyada golaha dhexe waxa ajandahooda soo diyaarinaaya xoghayaha guud ee xisbiga markuu la tashado hogaanka sare ee Xisbiga .

# QODOBKA 6AD

## GUDIGA FULINTA

### 1) XUBNAHA GUDIGA FULINTA

Xubnaha Gudiga fulintu waa hay’ada ugu saraysa socod siinta hawlaha xisbiga, waxaana ay ka kooban yihiin sideed xubnood oo laga soo xulayo golaha dhexe, mudada xilka ee Gudida fulintu waa shan sanadood oo ka bilaabmay maalinta shirwaynahu qabsoomay.

### XILALKA XUBNAHA GUDIGA FULINTA

Xubnaha golaha fulinta waxay ka koobanyihiin:-

1. Guddoomiyaha xisbiga
2. Guddoomiye kuxigeenka
3. Xoghayaha guud
4. Xoghayaha arimaha maaliyadda
5. Xoghayaha arimaha gudaha
6. Xoghayaha arimaha dibadda
7. Xoghayaha arimaha haweenka
8. Xoghayaha arimaha dhalinyarada

**WAAJIBAADKA GUDIDA FULINTA**

1. Horumarinta barnaamijka siyaasadeed, hirgelinta iyo dhaqan gelinta xeerka xisbiga.

2. Meelmarinta iyo fulinta go'aanada lagu ansixiyay shirwaynaha iyo fadhiyada Golaha Dhexe iyo socod siinta hawlaha Xisbiga.

3. Isku dubaridka iyo diyaarinta miisaaniyada xisbiga, ajandayaasha la hordhigayo fadhiyada Golaha Dhexe iyo warbixinaha la xiriira wax qabadka Gudiga Fulinta.

4. Wuxuu ansixinayaa xilalka guddiyada gobollada, degmooyinka, laamaha, xoghayayaasha guddiyada fulinta iyo hawl- wadeenada iyagoo la tashanaya taageerayaasha xisbiga ee deegaankaas.

5. Wacyi gelinta dadweynaha, abaabulka iyo hirgalinta hadafka siyaasadeed ee xisbiga oo ah ismaamul iyo talo wadaag.

6. Wuxuu iska xil saarayaa sidii loo horumarin lahaa adeegyada bulshada iyada oo lala kaashanayo kaalmo dibadeed iyo hayadaha samafalka, iyaga oo dhawraya danaha guud, islamarkaana haya'dahaas u fududaynaya helitaanka khubaro waddani ah ama caalami ah.

7. Waxaa waajib ku ah inay u gutaan si daacadnimo iyo isxilqaan ah hawsha loo xilsaaray, isla markaana dhawraan wada shaqaynta iyo xiriirka xubnaha kale iyo bulshadaba.

**FADHIYADA/KULAMADA GOLAHA FULINTA**

1. Fadhiyada caadiga ah ee Gudiga Fulintu waxay noqonayaan bishiiba mar waxaana shir gudoonka noqonaaya gudoomiyaha xisbiga hadii uu maqanyahayna gudoomiye ku xigeenka, hadii uu maqanyahayna Xoghayaha Guud, hadii ay arin degdeg ah timaado waxaa isugu yeeraya Gudoomiyaha ama in kabadan kala bar xubnaha Gudiga Fulinta 10 cisho gudahood.

2. Waxay ansixinayaan oo go'aaminayaan xubnaha xisbiga ka galaya golayaasha qaranka iyagoo la tashanaaya xaruma gobolada, degmooyinka iyo laamaha.

3. Gudida Fulintu waxa uu yeelanayaa gudi joogta ah oo ka kooban 3 xubnood oo ka kooban hogaanka sare ee xisbiga iyo 2 xubnood oo kale oo uu Gudiga iska dhex xulo

**2) AWOODAHA IYO SHAQOOYINKA GUDIGA FULINTA**

1. Kormeerka shaqooyinka maalinlaha ah ee xisbiga
2. Dhiirigilinta siyaasadaha xisbiga
3. Ka Caawinta guddiga doorashooyinka, qabashada doorashooyinka iyo magacaabista musharixiinta

4. Magacaabista gudiyada madaxabanaan, wakiilada doorashooyinka, madalada iyo ururada kale ee xisbiga sida:-
    a. Qorsheeynta ajendaha shirweynaha
    b. Kormeerka Shaqooyinka maalinlaha ah ee shaqaalaha xisbiga
    c. Uruurinta iyo soo bandhigista dhaqaalaha xisbiga
    d. Fulinta howlaha kale ee ay u wakiishaan shirweynaha iyo golaha dhexe ee xisbiga

**HABRAACA DOORASHADA GUDIGA FULINTA/GUNTANKA KULAMADA**

1. Waxaa soo dooranaya xubnaha golaha dhexe ee xisbiga iyadoo lagu saleynaayo halbeega isu dheeli tirka gender-ka iyo aqoonta iyo deegaanka
2. Shirarka golaha fulinta waxaa isugu yeeri kara gudoomiyaha xisbiga, iyo golaha dhexe
3. Guntanka kulamada gudiga fulinta waxuu ansaxayaa marka ay sedex meelood labo meel soo xaadiraan kulanka,
4. Go-aan gaarista xubnaha gudiga fulinta waxay ku ansaxeysaa 3/2 sedex meelood labo meelood xubnaha gudiga fulinta markay is raacaan
5. Goaanada lagu gaaro shirarka gudiga fulinta waxaa la marinayaa habraaca meel-marinta, hubinta, faafinta iyo keydka dukumentiga xisbiga iyadoo la qeexayo goobta, guntanka shirka, ujeedada, waqtiga iyo tirada ka soo qeyb gashay

# QODOBKA 7AD

## HOGAANKA XISBIGA

### 1) GUDDOOMIYAHA XISBIGA

1. Guddoomiyaha xisbiga waxa dooranaya Shirwaynha xisbiga.
2. Guddoomiyaha waa madaxa xisbiga, waxaanu guddoominayaa shirwaynaha iyo fadhiyada Golaha Dhexe.
3. Wuxuu masuul ka yahay diyaarinta hindise hogaamineed ka, qorshaha istiraatiijiga ah ee lagu balaarinayo taageerayaasha xisbiga heer federaal, gobol, degmooyin iyo laamo.
4. Wuxuu baadigoobayaa taageerada maadiga iyo tan macnawiga ah ee Xisbiga

5. Wuxuu bidhaaminayaa aragtida fog iyo hiigsiga Xisbiga, wuxuuna Saxiixaa Qoraalada Rasmiga ah ee Xisbiga.
6. Waxa uu magaca xisbiga ku saxeexi karaa heshiisysada dhexmara xisbiga iyo xisbiyada kale ka dib markay Gudiga Fulintu ku ogolaato cod haldheeriya dabadeed waxaa la hor keenayaa fadhiga ugu horeeya ee Galaha Dexe.
7. Wuxuu ku hadlaa magaca xisbiga kagana qayb gali karaa shirarka gudaha iyo dibada isaga/iyada oo aan ku xadgudbayn xeerka iyo barnaamijka xisbiga.

## 2) SHURUUDAHA GUDDOOMIYAHA XISBIGA

1. Qof kasta oo u tartamaya jagada guddoomiyaha xisbiga waa in uu buuxiyaa shuruudahan:
   a. In uu yahay xubin xisbiga ka tirsan islamarkaana buuxiya shuruudaha xubinimo
   b. In aan da'diisu ka yarayn 30 sano.
   c. In aqoontiisu gaadhsiisan tahay heer Jaamacadeed
   d. In uu Xisbiga ka tirsanadaa ugu yaraan labo sano
2. Qofna looma dooran karo guddoomiyaha xisbiga wax ka badan sedex jeer.
3. Jagada guddoomiyaha waxa ay ku banaanaan kartaa:
   a. Hadii guddoomiyaha kutimaado geeri.
   b. Hadii aay burto mid ka mid ah shuruudihii lagu soo doortay iyada oo aay ka go'aan gaarayaan 2/3 xubnaha Golaha dhexe
   c. Hadii uu iscasilo islamarkaana uu golaha dhexena ka aqbalo 2/3 meel, ama xilka looga qaado si xeerkan waafaqsan

## 3) GUDDOOMIYE KUXIGEENKA XISBIGA

1. Xisbigu waxa uu yeelanayaa Gudoomiye ku xigeen waxaana dooranaya shirweynaha.
2. Shuruudaha Gudoomiye-ku-xigeenka waxa aay la mid yihiin kuwa Gudoomiyaha
3. Wuxuu qabanayaan hawlkasta oo uu u igmado gudoomiyaha xisbig waxaanay ka caawinayaan socodsiinta hawlaha xisbiga.
4. Marka uu maqan yahay gudoomiyuhu waxa uu hawshiisa u sii igmanayaa gudoomiye ku xigeenka oo fulinaaya hawlihii looga baahnaa oo dhan, hadii isagu uu maqanyahay waxaa hawsha sii qabanaya xogahaya guud.

**4) <u>XOGHAYAHA GUUD EE XISBIGA</u>**

1. Xoghayaha Guud ee xisbiga iyo ku xigeenkiisa waxaa dooranaya shirweynaha.
2. Xoghayaha guud waxa uu masuul ka yahay socod siinta maamulka xisbiga guud ahaan.
3. Waxa uu diyaarinayaa qoraalada warbixinada miisaaniyada ajandayaasha lagaga doodayo fadhiyada G/fulinta, G/dhexe iyo shirwaynaha.
4. Xoghayaha guud waxa uu masuul ka yahay daba-galka fulinta go'aamada la ansixiyay iyo hirgalinta barnaamijyada siyaasada, isaga oo la kaashanaya xoghayaha ka muusalka ah hawshaas.
5. Xoghayaha guud waxa uu maamulayaa shaqaalaha xisaabaadka isla markaana waxa uu habaynayaa oo uu kaydinayaa dukumentiga xisbiga, waxaana uu diiwaan-gelinayaa oo uu ilaalinayaa hantida xisbiga.
6. Xoghayaha guud waxa uu madax u yahay xoghayayaasha kale ee Gudiga Fulinta waxaana uu ku kormeerayaa habsami u socodka hawlaha ay ka masuulka yihiin.
7. Xoghayaha guud waxa uu qabanayaa hawshii kale ee uu u xilsaaro guddoomiyaha xisbiga.

**5) <u>MUSHARIXIINTA XISBIGA</u>**

1. Guddoomiyaha xisbiga ayaa ah musharaxa madaxweynaha ee xisbiga.
2. Xubina looma sharixi karo musharax madaxweyne wax ka badan laba jeer

**6) <u>MUSHARIXIINTA GOLAYAASHA</u>**

1. Qof kasta oo u tartamaya golayaasha fulinta iyo sharci dejinta heerkasta waa in uu buuxiyaa shurudaha hoos ku xusan:
    a. In uu yahay xubin xisbiga ka tirsan oo buuxiyaya shuruudaha xubinimo, bixiyana qaaraanka Xisbiga
    b. In uu buuxiyo/buuxiso shuruudaha Xeeerarka Dalku uga baahan yihiin.
    c. In uu yahay ruux aaminsan barnaamijka Xisbiga.

**7) <u>DOORASHOOYINKA</u>**

2. Xisbigu wuxuu yeelanayaa  Gudddi Madaxbanaan ee Doorashooyinka oo maamulaya heerarka kala duwan ee xisbiga

3. Shirweeynaha Guud ee Xisbiga ayaa dhisaya guddiga madaxbanaan ee doorashooyinka xisbiga.
4. Xeerka ay ku shaqeeynayaa gudigaas waxaaa ansaxinaya golaha dhexe ee xisbiga, waxaa kaloo uu u wakiilankaraa gudiga fulinta.
5. Tirada guddiga doorashooyinka waa inayna ka badnaan toddobo xubnood.
6. Masuuliyaddaha guddiga doorashooyinka waxa ka mid ah:
7. Inay maamulaan doorashooyinka dhammaan hay`adaha hisbiga ee Heer kasta.
8. Inay si joogta ah u diiwaan geliyaancod-bixiyayaasha dib u eegisna ku sameeyaan xaashiyaha cod-bixiyayaasha
9. Inay diiwaan geliyaan musharaxiinta doorashooyinka
10. Xallinta cabashooyinka doorashooyinka
11. Fududeynta kor-joogista, ilaalinta iyo qiimeynta doorashooyinka.
12. Wacyi gelinta cod-bixiyayaasha
13. Golaha fulinta xisbigu wuxuu magacabaayaa guddiga xallinta cabashooyinka doorashooyinka.

# QODOBKA 8AD

## SAXIIXAYAASHA IDMAN EE XISBIGA

Saxiixayaasha idman ee xisbiga waxay ka koobanyihiin:-

1. Guddoomiyaha xisbiga
2. Guddoomiye kuxigeenka xisbiga
3. Xoghayaha guud ee xisbiga
4. Xoghayaha maaliyadda

# QODOBKA 9AD

## DOKUMIINTIYADA SIYAASADEED

Dokumintiyada siyaasadeed ee uu xisbiga soo saarayo, hanaanka loo soo saarayo iyo habraaca loo fulinayo:-

1. Curinta soosaarista dokumintiyada siyaasadeed waxay ka bilaabanaysaa unugyada kala duwan ee shaqaalaha xisbiga ama/iyo guddi ay u xilsaareen golaha fulinta xisbiga.

2. Warbixinada siyaasadeed iyo joogtayntooda taasoo uu xisbigu soosaaridoono waxay ka koobnaan doonaan habraac soosaaris, habraac fulineed iyo habraac faafineed
    a. Bayaanka iyo qorshaha istaraatijiyadeed ee xisbiga waxaa soo saaraya guddi hoosaad kamid ah guddiga fulinta
    b. Guddiga fulinta ayaa ku ansixinaya kalfadhi u furan dadweynaha
3. Siyaasadaha maareynta hantida iyo nidaaminteeda, dardar gelinta iyo maalgelinta hantida xisbiga siyaasiyan, iyo magacaabidda dadka masuulka ka ah.
    a. Xoghayaha guud iyo khasnajiga xisbiga ayaa soo jeedinaya dokumintiyada maalgashiga xisbiga waxaana ansixinaya golaha fulinta
4. Xeernidaamiyaha magacaabista iyo doorashooyinka xisbiga iyo diyaarinta liiska ama diiwaanka xubnaha xisbiga
    b. Xeer nidaamiyaha magacaabista iyo doorashooyinka waxaa soo saaraya golaha fulinta waxaana fulinaya guddiga madaxabaan ee doorashooyinka
    c. Dokumintiga diyaarinta diiwaanka xubnaha waxaa soo saaraya xoghayaha guud waxaana ansixinaya golaha fulinta
5. Soojeedinta wax kabadalista iyo kaabista xeer nidaamiyayaashan waxaa leh golaha fulinta

# QODOBKA 10AD

## MAAMULKA MAALIYADDA IYO HANTIDA XISBIGA

### 1) DAKHLIGA IYO QARASHAADKA

1. Xisbig daryeel qaran hantidiisa guurtada iyo ma guurtaba waxaa u xilsaaran Hanti Dhawrka Xisbiga.
2. Gudida hanti dhawrku waxay ka koobantahay shan xubnood oo G/dhexe iska soo dhexdoortaan oo u madax banaan shaqadooda.
3. Gudidaasi waxay toos u baari karaan dhamaan xafiisyada xisbiga iyo hantida xisbiga waxayna warbixin toosa u gudbin karaan Golaha Dhexe waxayna toosin karaan maamulka xisaabaha ee Xisbiga.
4. Gudidaasi waxay hubinayaan dhammaan hantida xisbiga haddii ay tahay guurto iyo ma-guurtaba.
5. Guddidaasi waxay shaqada ka joojin karaan hadii ay la kulmaan cid si khaldan ugu tagrifashay hantida xisbiga, iyaga oo la socodsiinaya madaxda ka sarraysa haddii

ay u caddaato in lagu tagri falay hantida xisbiga waxay u gudbin karaan Golaha dhexe oo goaan ka gaadhaya.

## 2) ILAHA DHAQAALAHA XISBIGA

Dakhliga xisbiga waxa uu ka imaanayaa:

1. Qaaraanka ay bixiyaan xubnaha xisbiga qaab 3 biloodle ahna loo hormarinayo.
    a. Maalgashi uu xisbiga sameeyey.
    b. Deeq aan shardi ku xirnayn.
    c. Sadaqada iyo kaalamda xubnaha ururka
    d. Iyo Meelo kale hadii aysan shuruucda dalka ka hor imaanaynin.
2. Kharashka & xisaabaadka xisbiga.
3. Xisbigu wuxuu yeelanayaa ku tala-gal miisaaniyad sanadeed dakhli iyo kharash isugu dheeli tiran.
4. Waxaa kaloo yeelanayaa xisaab-xir sanadeed dakhli iyo kharash ah
5. Diiwaanka guud ee hantida guurtada iyo maguurtada ee xisbiga. A. Xisbigu waxa uu yeelan karaa hanti guurto ah ama ma guurto ah, hantidaasina waxay ka imaan kartaa kaalmada ay xukuumadu si siman u siiso Xisbiyada Qaranka iyo Khidmada ama fiiga ay bixiyaan musharixiinta golayaasha qaranka u tartamaya.
6. Qaaraanka ay bixiyaan xildhibaanada xisbiga usoo baxaa. Iv. Faahfaahinta maaliyadda xisbigu waxey ku soo baxeysaa xeer hoosaadka maaliyadda

## 3) HABKA MAAMULKA IYO MAARAYNTA MAALIYADDA XISBIGA.

1. Xisaab-xir Sanadeedka iyo dhaqdhaqaaqa xisaabta Xisbiga waxaa u xilsaaran waxna laga weydiinayaa xoghayaha maaliyadda iyo xisaabyaha guud ee Xisbiga,iyadoo uu mar kasta xog ogaal u noqonayo xoghayaha guud ee Xisbigu si uu ula wadaago hogaanka Xisbiga iyo Golayaashiisa.
2. Warbixinada la xiriira xisaabaadka Xisbiga hadii ay soo dalbadaan Hay’ado ka baxsan Xisbiga waxaa la ogeysiinayaa Hogaamiyaha Xisbiga, Gudoomiyaha Gudiga Fulinta iyo Xoghayaha Guud ee Xisbiga, ogolaanshiyahooda ayaana lagu bixinayaa.

# QODOBKA 11AD

## XAFIISKA HOWLWADEENADA, MUTADAWICIINTA IYO SHAQAALAHA XISBIGA

1. Xisbigu wuxuu yeelanayaa Xafiis qaabilsan mutadawiciinta diyaarka ah, Shaqaalaha iyo hawlwadeenada Xisbiga.
2. Xafiiskani wuxuu si toos ah u hoos imaanayaa Xoghayaha Guud ee Xisbiga.
3. Shaqaalaha & mutadawiciinta diyaarka ah waxaa soo diyaarinaya saraakiisha Xafiiska, marka ogolaansho iyo baahi ay ka timaado Xafiiska Xoghayaha Guud ee Xisbiga.
4. Shaqaalaha iyo hawlwadeenada Xisbigu ma xadidna ee waa hadba baahidu shaqo inta ay la egtahey.
5. Xafiiska shaqaalaha iyo hawlwadeenada Xisbiga wuxuu dhawrayaa kaalinta
6. Haweenka iyo Dadka deegaamo looga tira badan yahay deggan, sido kale xeerka
7. Shaqaalaha Rayidka ah iyo sharciyada Dalka u Deggan.
8. Siyaasaadka Xisbiga ee shaqaala qaadashada & hanaanka loo marayo waxaa golaha fulinta xisbigu ka soo saarayaa xeer gaar ah, kaasoo dhaqangal noqon doono marka uu ansixiyo golaha dhexe.

# QODOBKA 12AD

## ILAALINTA DIMOQRAADIYADDA

1. Xisbigu wuxuu aaminsanyahay in haweenku lafdhabar u yihiin guud ahaan hawlaha siyaasada, gaar ahaan kuwa xisbiga la'aantood na la dhaqaaqi karin, ayadoo xoog weyn lagu bixinayo in haweenku kaalin hogaamineed ka qaataan siyaasada dalka.
2. Xisbigu wuxuu taageero dhinac kasta ah siinayaa ururada haweenka iyo kuwa bulshada rayidka ah ee ay dumarku hogaamiyaan ee ka shaqeynaya horumarinta dumarka iyo ilaalinta dhaqanka wanaagsan ee haweenka Soomaaliyeed ay xambaarsan yihiin.
3. Xisbiga Daryeel Qaran waxey u tahay ilaalinta mabaa-diida Ururada Haweenka Soomaaliyeed iyo Dadka deegaamo looga tira badan yahay deggan, ayadoo qeybahaas tixgalin gaar laga siinayo hogaamka xisbiga, hawl wadeenada iyo shaqaalaha xisbiga dhexdiisa.

4. Waxey Yeelanayaan qoondo ahaan Saamiga 30%Shaqaalaha iyo Hawl wadeenada Xisbiga iyo Golayaashaba.
5. Xisbigu wuxuu tixgelin gaar ah siinayaa islamarkaana ilaalinayaa xaquuqda dimuqraadiyadeed ee dadka laga tirada badan yahay, curyaamiinta, caruurta iyo waayeelka

# QODOBKA 13AD

## XALINTA KHILAAFAADKA XISBIGA GUDIHIISA

Xisbiga daryeel qaran waxa uu yeelanayaa guddiga madax banaan ee xalinta khilaafaadka oo leh heerar kala sareeya sida 1, Heer Qaran, 2, Heer Gobol iyo 3, Heer Degmo.

**1) QAABDHISMEEDKA GUDDIGA:-**

1. Tirada Xubnaha guddiga waa todoba, waxayna xilka haynayaan mudo 6 sano ah
   - i Gudoomiye
   - ii Gudoomiye ku xigayn iyo
   - iii Xoghaye
2. Xubnaha guddigan waxaa ka reeban kamidnoqoshada hay'adaha xisbiga iyo guddiyada kale ee xisbiga
3. Xubnaha guddigan waa in aysan kabadan 1/3 hal jinsi.

**2) MASUULIYADDA GUDDIGA:-**

1. Khilaafaadka u dhaxeeya xubnaha xisbiga.
2. Khilaafadka u dhaxeeyo xubnaha iyo xisbigooda.
3. Murunka ka dhasha magacaabidda murashaxiinta dorashada ka hor.
4. Muranka ka dhasha doorashada ama magaacabista hawl-wadeenada xafiisyadda xisbiga.
5. Muranka ka dhasha qeybsiga xilalka la'isu magacaabo doorashada kadib.
6. Muranka ka dhasha maamulidda maaliyadda iyo hantida kale ee xisbiga.
7. Murunka ka dhasha maamulidda arrimaha xisbiga.

**3) DHISIDDA GUDDIGA:-**

1. Xubnaha guddiga xalinta khilaafaadka waxaa soo xulaya guddoomiyaha xisbiga
2. Shuruudaha lagu soo xulayo waa:-

a. Buuxinta xubinimada xisbiga
b. Aqoon sharci ama khibrad u dhiganta
c. Akhlaaq wanaag
d. Sumcad
e. Cod haldheeri ah (50+1) ayay ku ansixinayaan galaha fulunta xisbiga

**GOAAN GAARIDA GUDIGA:**

**Gudiga madaxa banaan ee xalinta khilaafaaadka xisbiga daryeel qaran wuxuu goaanadiisa ku ansixinayaa tiro cod dheeri ah oo ah (50+1)**

**4) HABRAACA XALINTA KHILAAFAADKA**

1. Cabashada haddii ay lid ku tahay hogaamiye, guddoomiye, xoghaye heer qaran ah waxaa dacwaddaas qaadaya guddiga heer qaran.
2. Cabashada haddii ay lid ku tahay musuuliyiin heer gobol waxaa khilaafaadkaas xalinaya guddiga heer gobol.
3. Cabashada haddii ay lid ku tahay masuuliyiin heer degmo waxaa khilaafaadkaas xalinaya guddiga heer degmo.
4. Cabashada haddii ay lid ku tahay xubin caadi ah waxaa khilaafaadkaas xalinaya guddiga ka dhisan goobta xubintu iska soo diiwaangalisay, haddii aysan xubintu u wareegin deegaan kale.
5. Qabashada cabashooyinka khilaafaad ka waa in ay ahaadaan dokuminti qoraal ah.
6. Xafiiska qabashada cabashooyinka waxaa guddiga u qaabilsan xoghayaha guddiga
7. Xoghayaha guddiga marka ay soo gaarto cabashada, waa in uu ku wargaliyaa dhinaca laga cabanayo.
8. Xoghayaha guddiga waxaa uu diyaarinayaa galfaylka dacwaddan, isagoo u gudbinaya guddoomiyaha guddiga muddo toddoba 7 maalmood gudahood.
9. Guddoomiyaha ayaa yeelanaya qabashada kalfadhi lagu dhagaysanayo dacwadda
10. Kalfadhiga dhageysiga dacwadda waa in ay joogaan:-
    a. Dacwad qabaha
    b. Ladacweeyaha
    c. Dad ku xeeldheer afka lagu qaadayo dacwadda
    d. Qareeno u dooda labada dhinac haddii loo baahdo

e. Markhaatiyaal haddii loo baahdo

11. Haddii uu labada dhinac midkood ku qanci waayo go'aanka guddiga xalinta qilaafaadka gaaray, waxaa jira guddi racfaan loo qaadan karo.
12. Habraaca racfaanka wuxuu noqonayaa sida:-
    a. Muddada qaadashada racfaanka waa toban iyo afar maalmood gudahood
    b. Waa in la gaarsiiyaa eedaysanaha dacwadda racfaanka muddo 14 maalmood kahor intaan racfaanka la qaadin
    c. Dacwad qabaha iyo eedaysanaha waa in lagu wargaliyaa in guddigu go'aankii hore adkeeyay iyo in wax laga badalay.
    d. Guddiga racfaanka xisbiga gudihiisa waa go'aanka ugu dabeeya ee xisbiga gudihiisa
    e. Dacwad qabaha iyo eedaysanaha haddii ay ku qanci waayaan go'aanka guddiga racfaanka, waxaa u furan racfaan maxkamadeed.
    f. Gudiga madaxa banaan ee xalinta khilaafaaadka xisbiga  wuxuu goaanadiisa ku ansixinayaa tiro cod dheeri ah oo ah (50+1)

# QODOBKA 14AD
## ANSHAXMARINTA XISBIGA

Xisbiga daryeel qaran waxuu yeelanayaa gudiga madaxa banaan ee anshax marinta oo leh heerar kala sareeya sida heer qaran, gobol iyo degmo.

Masuuliyadda guddiga:-

1. In aay go'aan ka gaaraan eedeynta ashax daro, xad gudub ku saabsan dastuurka xisbiga, hab-raaca howl fulinta, wax u dhimid ama ka hor imaansho siyaasadda xisbiga.
2. In aay go'aan ka gaaraan eedeynta la xariirta si xun u isticmaalka daqliga xisbiga.
3. In aay go'aan ka gaaraan eedeynta anshaxa daro ee la xariirta ka bixin turjimaad qaldan iyo u hogansanan la'aan shuruucda iyo xeerarka xisbiga.
4. Haddii ay timaado hanjabaad ku wajahan xubin ama xubno katirsan xisbiga ama xisbi kale, guddigu waa inuu ciidamada amniga qoraal ku wargeliyaa.

**1) QAAB-DHISMEEDKA GUDDIGA:-**

1. Tirada Xubnaha guddiga waa todoba, waxayna xilka haynayaan mudo 6 sano ah
    a. Gudoomiye

b. Gudoomiye ku xigayn iyo
c. Xoghaye

2. Xubnaha guddigan waxaa ka reeban kamidnoqoshada hay’adaha xisbiga iyo guddiyada kale ee xisbiga
3. Xubnaha guddigan waa in aysan kabadan 1/3 hal jinsi.

**2) DHISIDDA GUDDIGA:-**

1. Xubnaha guddiga anshaxmarinta waxaa soo xulaya guddoomiyaha xisbiga
2. Shuruudaha lagu soo xulayo waa:-
   f. Buuxinta xubinimada xisbiga
   g. Aqoon sharci ama khibrad u dhiganta
   h. Akhlaaq wanaag
   i. Sumcad
3. Cod haldheeri ah (50+1) ayay ku ansixinayaan galaha fulunta xisbiga

**3) FALALKA ANSHAXMARINTA**

1. Xad gudub ku saabsan dastuurka xisbiga
2. Xad gudub ku saabsan hab-raaca howl fulinta
3. Wax u dhimid ama ka hor imaansho siyaasadda xisbiga
4. Si xun u isticmaalka daqliga xisbiga
5. Ka bixin turjimaad qaldan
6. Shuruucda iyo xeerarka xisbiga
7. Hanjabaad ku wajahan xubin ama xubno katirsan xisbiga ama xisbi kale
8. Xubnaha golayaasha oo aan soo xaadirin fadhiyada in kabadan 3 fadhi sabab la’aan

**4) QAABKA DACWAD QAADISTA: -**

1. Guddigu wuxuu dhagaysanayaa dacwadda.
2. Xoghayaha guddiga wuxuu qaadayaa qoraalka dacwadaas.
3. Dacwad qoraalkaas waa in uu u diyaariyaa si faahfaahsan isagoo tilmaamaya eedeymaha lasoo jeediyay iyo sababaha la xiriira.
4. Xoghayaha waa in qoraalka ku muujiyaa dambiga la sheegay in la galay, iyo qodobada dastuurka, xeerarka, xeer hoosaadyada iyo hab dhaqan wanaagga la jabiyay.

5. Ka hor intaan dhagaysiga dacwada bilaabmin, muddo shan maalmood gudahood ama ka yar haddii arrintu deg deg tahay, waa in qareenka ama eedeysanaha lagu siiyaa qaab qoral iyo codba ah eedeymaha lagu haysto, islamarkaana laga saxiixaa.
6. Markii ay dhagaysiga dacwada dhamaato gudiga wuxuu cod u qaadayaa kiiska
7. Codka gudiga wuxuu noqonayaa cod hal dheeri ah 50+1
8. Dhinacyada ay khuseeyso dacwadda haddii ay ku qanci waayaan go'aanka guddiga waxaa u furan racfaan.

**5) SHURUUDAHA ANSHAXMARINTA:-**

1. In la waayay caddaymo ku filan oo la xiriira eedaha lasoo jeediyay, sidaana uu xor ku noqdo eedaysanaha.
2. Digniin qoraal ah
3. Ganaax lacageed
4. Shaqo lacag la aan ah oo uu ka qabto/ ka qabato xisbiga gudihiisa.
5. Laalid xubin nimadiisa/xubinnimadeeda xisbiga.
6. Ka saarid xisbiga.

# QODOBKA 15AD

## WAXKABADALKA IYO KAABISTA DASTUURKA, MAGACA IYO ASTAANTA

1. Wax ka bedelka iyo kaabista xeerka, magaca iyo astaanta xisbiga waxa la samayn karaa shirweynaha Xisbiga waxaana awooda ansixintiisa leh shirweynaha Xisbiga.
2. Hadii ay timaado arin lagama maarmaan ka dhigaysa in kaabis ama wax kabedel qodob ama qodobo xeerka ka mid ah waxa soo jeedinaaya hogaanka sare ee xisbiga ama gudida fulinta oo soo diyaarinaaya iyagoo u maraya wax kabedelka iyo kaabistu mid waafaqsan xeerka xisbiga iyo xeerarka dalka.
3. Hogaanka sare iyo gudida fulintu waa in ay soo hordhigaan soo jeedinta wax kabedela iyo kaaabista golaha dhexe ee xisbiga in la sameeyo iyo in kale, cod ayayna u qaadayaan 1/3 xubnaha Golaha Dhexe ,golaha dhexe hadii uu ogolaado in xeerka lagu sameeyo kaabista iyo wax kabedelka waxa waajib ku ah in ay u gudbiyaan haayada sharci ahaan ka sareysa oo ah shirweynaha rasmiga ah ama shirweyne aan caadi ahayn.

4. Shirweynuhu markuu helo soo jeedinta iyo ogolaanshaha golaha dhexe waxa u banaan inuu ansixiyo iyo inuu diidoba.

# QODOBKA 16AD
## HABKA XISBI KUBIIRISTA

1. Xisbigu wuxuu ku biiri karaa Xisbi, Xisbiyo ama Isbaheysi Xisbiyo kale, waxayna ku imaan kartaa xaaladaha Soo socda
2. Xisbiga oo u baahda aqlibiyad kuraas Baarlamaan, si uu Xukuumad u soo Dhiso.
3. Xisbiga oo u arka in uu u baahan yahey Isbaheysi si loo meel mariyo fikrado io himilo siyaasadeed uusan keligii Ku flleyn.
4. Hadii uu Xisbigu waayo ama arko in uusan heysan xubno ku fillan si uu u Noqdo Xisbi Kumeel gaarka ka gudba oo u gudba Xisbi Rasmi ah.
5. Dhamaan Qodobada ku xusan xarafka (a) ee Isla qodobkan waxaa soo jeedin kara hogaanka sare ee Xisbiga ama ugu yaraan 3 sadex xubnood oo xilal muhiim ah u haya Xisbiga kana mid ah Guddiga Fulinta.
6. Dhamaan soo jeedinta Qodobadan waxaa ansixinaya Iskuna raacaya xubnaha Gudiga Fulinta 3 Meelood Labo., ayadoo go’aankaas loo gudbinayo golaha dhexe si uu u ansixiyo 50+1 oo ah cod haldheeri ah.

# QODOBKA 17AD
# FASIRAADDA DASTUURKA

1) Hadii xeerka xisbiga khilaaf sharci ka yimaado waxa hogaanka sare ee xisbiga ku waajib ah in la diwaan galiyo qodobada ama faqradaha laysku khilaafsanyahay fasirkooda. 2) Hogaanka sare waa inuu hordhigaa qodobadii uu diwaangaliyey kalfadhiga golaha dhexe ee rasmiga ah ama aan caadiga ahayn.

3) Golaha dhexe ee xisbiga waxa ku waajib ah inuu dhageysto doodaha fasiraadaha dhinacyada fasirka ku doodaya, kadibna waa in ay gudi ka kooban golaha dhexe iyo sharci yaqaano aan xisbiga ka tirsanayn u xilsaartaa fasiraada.

4) Gudiga loo xil saaray soo fasirka waa in ay usoo gudbiyaan xoghayaha golaha dhexe isagoo soo hordhigaaya kalfadhi aan caadi ahyn oo qabsoomaya ugu badnaan afar bilood marka go’aanka gudida loo xilsaaray aay xoghayaha u soo gudbiso

5) Hadii dhinac ku qanciwaayo fasiraada gudida waxa ufuran in ay ka dalbadaan in loogu gudbiyo maxkamada dastuuriga ah ee dalka iyadoo codsigaas uu qori doono xoghayaha golaha dhexe ama ku xigeenkiisu

## QODOBKA 18 AAD

## XEER-HOOSAAD

1. Golaha dhexe waxa uu soo saari karaa xeer hoosaadyo aan ka horimanayn xeerkan

## QODOBKA 19 AAD

## DHAQANGALKA XEERKA XISBIGA

1. Xeerkani waxa uu dhaqan gelayaa marka uu ansixiyo shirwaynaha Xisbiga.

## QODOBKA 20 AAD

## BAABI'INTA XISBIGA IYO HANTIDIISA

1. Hadii xisbiga ay soo waajahdo duruufo uu ku shaqayn waayey sida a) hanti La'aan, b) khilaaf soo noq-noqda oo xal kama danbeys ah loo waay c) waxyaabihii kale ee caqabad ku noqda socodsiinta hawlaha Xisbiga oo laga maarmaan ka dhigaya burburka Xisbiga.

2. Hadii sidoo kale uu Xisbigu baaba'o isaga oo talada Qaranka haya hantida Xisbigu Waxey Noqoneysaa Hanti Qaran.

3. Markiise uu Xisbigu Baaba'o, Isagoon Talada Qaranka hayn, hantida Xisbiga waxaa lagu wareejinayaa xisbiyada ay bah wadaagta yihiin xisbiga Daryeek Qaran

4. Marka la iclaaminayo baab'inta xisbiga waxaa soo jeedinaya golaha fulinta, waxaana loo yeerayaa shirweyne degdeg ah si arrintan masiiriga ee baabi-inta xisbiga iyo hantidiisa goaan looga qaato, isagoo ku ansixinaayo cod aqlabiyad leh ama 3/2 sedex meelood labo meel

Sloganka Xisbiga Daryeel Qaran

(HONEST + HARD WORK)

**DAACADNIMO IYO HAWL-KARNIMO**

**DHAMAAD**